



Warbixinta Caafimaadka Pulse: Tallo-soo jeedinta tallaalka HPV sida aad uga hortagto cudurada keena Kansarka

Bil kasta, Xarumaha Caafimaadka ee Degmada Multnomaha waxa ay u soo jeedin doona tallo la xiriirta caafimaadka ardayda iyo qoysaska. Maanta mawduucu wuxuu yahay: Tallaalka HPV.

Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurada waxa ay tallo u soo jeedinayaa dhallinyarada inay qaataan tallaalada lagaga hortago Fayrasyada Bani'aadamka u keena cudurka Kansar ee afka, cunaha, iyo qoorta. Waxaa dhammaan waalidiinta lala socodsiiinayaa dhalay ardayda fasalada lixaad iyo sideedaad, waxaa la soo gaaray waqtigii ilmahaagu qaadan lahaa tallaalka HPV.

Marka tallaalkii hore la garab dhigto kani waxa weeye mid cusub, waxaa loogu talagalay inuu ka hortago HPV, kaasi oo ah cudurada inta badan si caadiya la iskugu gudbiyo galmada. Si dhib yar ayaa la isku gudbin karaa marka ay istaabtaan jirku.

Ururka Bulshada ee Kansarka Maraykan waxa ay ku qiyaasaan in ka badan boqolkiiba 80 in inta ay nool yihiin dadka waaweyni ee galmoon karaa ay qaadi karaan cudurka HPV. Cudurka HPV wuxuu sabab u noqon karaa cudurada Kansaraka, oo ay ka mid yihiin ka qoorta ku dhaca, cunaha, carabka iyo dabada, kuwo kale oo fara badan.

"Hooyo ahaan, waxaan ogsoonahay in waalidiintu ayna diyaar u ahayn in ay bilaabmaan sidii ay uga fikiri lahaayeen qaangaarka ilamahooda dhinaca galmada," sidaas waxaa tiri Kristin Case, madaxa Kalkaaliyaasha Caafimaadka Xarumaha Caafimaadka Ardayda Degmada Multnomah. "Anigoo ah Kalkaaliye Caafimaad(NP) waxaa halkan idiinka sheegayaa in ay arrintaasi taasi tahay. Tallaalka HPV waxa uu yahay ka hortag. Waana waxa lagaga hortagi karayo ka hor inta aan galmadu dhicin, sidaas awgeed waxaan idinku dhiirigalinayaa haddii aad tihiin waalidiinta in aan tixgalisaa ay ardeydoodu bilaabeysa fasalka shanaad."

Tallaalkan waxaa loo qaataa labo qeybood oo isxiga muddo ku siman sannad. Dhallinyarada waxa la siin karaa marka ay xitaa da'doodu tahay 9 sanno iyo ilaa 26 sanno.

"Waxaa jira dhowr arrimood oo aan waalid ahaan aan qaban karno run ahaan si aan u ilaalino caruurteena," ayey tiri Case. "Waxaan ku faraxsanahay in aan iraaqdo cudurka Kansarka oo aan ka hortagnaa inay ka mid tahay. Tallaalka HPV waxa weeyaan qalabka ugu wanaagsan ee aad kagaga hortagi karto ee aan maanta haysano."

Tallaalka HPV waxaa dammaanad qaada kharashka ku baxay caymiska caafimaadka ay ku siiyaan daryeelayaasha caafimaadku. Ardayda ku jirta da'da iskuulada tegta waxa ay sidoo kale ka helin karaan tallaalka HPV Goobaha Xarumaha Caafimaadka Ardayda Degmada Multnomah.

Halkan ka fiiri haddii aad u baahan tahay warar dheeraad ah:

[American Cancer Society HPV page](#)

[CDC page on HPV](#)

Waxaa jira 12 goobood oo sagaal ka mid ahi ku yaalaan dhismayaasha Dugsiyada Dadweynaha Portland oo ah Xarumaha Caafimaadka Ardayda Degmada , kuwaasi siiya ardayda addeegyo kala duwan. Si aad u aragto goobaha iyo saacadaha ay shaqeeyaan, waxaad ka fiirisaa shabakada mareegta barnaamijka.